






Education &
Communities

Getting ready for school

A guide for parents of a child with disability

U diyaargarobida dugsig

Tusaha waalidka qaba ilmo iin leh





Bilaabida Kindergarten waa tallaabo xiiso u leh ilmo kasta noloshiisa. U doorida ilmahaaga dugsi waa go'aan weyn ee waalidiinta qaba carruur iinleh , nidaamkan waxaa laga yaabaa inuu noqdo mid lug ku yeelasho badan leh.

Tusahan waxaa loogu talagalay inuu kaa caawiyo nidaamka u diyaargarowga iyo doorashada dugsiga ugu fican ee fulinaya baahida ilmahaaga.

Meeshaad ka bilaabi lahayd

- Haddii aad leedahay ilmo iinleh waxaa lagu talinayaa inaad midkood xiriir la sameyso dugsga xaafadaada ama xafiiska gobolkaaga 12 bilood ka hor intuusan ilmahaagu dugsga bilaabin. Tan waxay ku siin doontaa fursad aad kala hadasho baahida ilmahaaga taageerada iyo waxbarashada khaaska ah shaqaalaha khuseeya.
- Meesha uu ilmahaagu leeyahay baahi khaas oo jireed waxaa lagu talinayaa inaad xiriirka ugu horeeya la yeelato dugsga xaafadaada ama xafiiska gobolka laba sanno ka hor intuusan dugsga bilaabin. Tani waxay siinaysaa wasaaradda wakhti ay ku hubiyaan in la ogaado fursadaha dugsiyeed ee kuu bannaan iyo in la diyaariyo wixii tasiilaad ah marka ilmahaagu dugsga bilaabo.
- Markaad la kulanto maamulaha sii qaado wax kasta oo khuseeya oo ah qiimeynta daawo iyo daaweyntii kaleba si aad ula wadaagto.
- La hadal xubnaha netwaaga taageerada (tusaale, qoyska, saaxiibada, dakhtarka, dhakhtarka carruurta, kooxda u dooda, netwaaga iinta, fiisiyoterabiistaha, cilmi nafsiga, daaweeyaha dhaqdhaqaaqa, hadal baraha) iyo waalidka kale ee carruur iin leh dugsga u dhigato wixii ku saabsan waayo aragnimadooda.
- Adeega dugsga ka horeeya ama kuwa kale ee carruurnimada hore ayaa sidoo kale kaa caawin kara u gudbida dugsga. Haddii aysan ilmahaaga taageerin adeegyadani waxaad la xiriiri kartaa dugsga xaafadaada ama xafiiska gobolka oo laga yaabo inuu siiyaan barnaamijka dugsga u gudbida khaaska ah ee goobtaada. Waxaad la xiriiri kartaa xafiiskaaga gobolka taleefankaaga guriga: Tel 131 536.



Fursadaha diiwaangelinta

- NSW oo dhan, Wasaaradda Waxbarashada iyo Jaaliyadaha ((Department of Education and Communities) (DEC) waxay bixisaa adeegyo tiro badan oo lagu taageerayo ardeyda qaba baahida khaaska ah.
- Waalid ahaan ama xannaaneeye leh ilmo qaba iin la xaqiijiyeed waxaad ka fekeri kartaa fursadahan waxbarasho ee soo socda:
 - dugsigaaga xaafada
 - fasal khaas ah oo ku yaal dugsi caadi ah
 - Dugsi khaas ah (Dugsi Ujeedooyin khaas ah loo sameeyey)

Helida fursada dugsiyeed ee saxda ah

Maamulaha dugsi, la tashiga kooxda taageerada iyo waxbarashada dugsi, wuxuu kaa caawin doonaa inaad hesho fursada dugsi ee saxda ah ilmahaaga, adoo tixgelinayaa doorashadaada, baahida taageero iyo waxbarashada khaaska ah ee ilmahaaga iyo u dhawaanshaha adeegyada khaaska ah ee degaanka. Xafiiskaaga degaanka wuxuu sidoo kale kaa caawin doonaa inaad hesho fursada saxda ah ee ilmahaaga.

Diiwaangelinta ilmaha iinta leh

- Diiwaangelinta fasalada caaddiga ah waxaa lagu sameeyaa dugsigaaga degaanka.
- Diiwaangelinta dugsi khaaska ah ama dugsi khaaska ah waxaa lagu sameeyaa nidaam loo yaqaan kooxda meelaynta gobolka.
- Macluumaadka ku saabsan tan waxaa lagu heli karaa iyadoo lala xiriiryo xafiiska gobolkaaga 131536 xafiiskaaga guriga.

Sameynta liiska kooban

- Waxaad isticmaali kartaa tilmaamaha dugsi ee interneetka si aad u ogaato dugsigaaga xaafada www.schools.nsw.edu.au/schoolfind/locator/ Halkan, waxaad ku raadin kartaa nooca dugsi ee dugsiyada khaaska ah ee loo yaqaan dugsiyada ujeedada khaaska ah laakiinse xasuuso isudiwaangelinta tasiilaadkan waxay u baahan tahay inlagu sameeyo xafiiskaaga gobolka. Waxaad kala xiriiri kartaa xafiiska gobolka 131 536 taleefankaaga guriga.
- Sameeyso ballan aad kula kulanto maamulaha dugsiaga xaafada si aad ugala hadasho fursadaha iyo baahiyaha khaaska ah ee ilmaha. Waalidiin fara badan waxay taageero ka helaan iyagoo soo kaxeysanaya saaxiib ama qof qaraabo ah.
- U soo qaad dhammaan qiimeynaha caafimaad ee ugu dhow kulankan si aad ula wadaagtid shaqaalaha waaxda.
- Waxaa laga yaabaa inaad jeclaato diyaarinta liis su'aalo ah ama waxyaalaha aad saluugsan tahay ee aad ka qabto baahida waxbarasho ee ilmahaaga si aad ugala hadasho kulankan.



Taageero dheeraad ah

Haddii ilmahaagu leeyahay iin ama dhib ka heysto waxbarashada oo uu u baahan yahay taageero dheeraad ah dugsiga fadlan la xiriiir maamulaha dugsiga ilmahaaga ama xafiiska gobolka ee degaankaaga.

Waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha waa isha muhiimka ah ee macluumaadka ku saabsan xoogga carruurta, awooda iyo baahida. Shirko wax ku ool ah oo u dhaxeysa dugsiga iyo waalidiinta waxaa laga yaabaa inay horseedo natijjo wanaagsan inay helaan ardeydo.

Kooxda taageerada iyo waxbarashada ee dugsiga kasta waxay caawiyaan macalimiinta fasalka si ay u fuliyaan baahida waxbarasho ee ardeydooda. Waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha waxay leeyihiin door muhiim ah oo ay ka ciyaaraan shaqada kooxda taageerada waxbarashada iyagoo ka qaybqaadanaya wadahadalka iyo qorsheynta baahida carruurtooda.

Dugsiyada dawlada ee NSW waxay siiyaan caawimaad dheeraad ah ardeyda leh iinta ama waxbarashadu ku adag tahay siyaalo kala duwan, iyadoo loo eegayo baahida shakhsiyeed ee arday kasta.

Taageeradan waxaa ka mid noqon kara:

- Isbedelada ay macalimiintu ka sameeyaan fasalka dhexdiisa ee barnaamijyada waxbarashada iyo waxbarida ee maalin kasta
- Helitaanka shaqaale khibrad takhasusa leh oo taageera ardeyda iyo macalimiinta fasalkooda
- Caawimaad dheeraad ah oo fasalka dhexdiisa ah oo ay ka helayaan shaqaalaha taageerada
- Bixinta qalab iyo alaab khaas ah
- Helitaanka tababarka takhasuska ah ee loogu talagalay shaqaalaha taageerada iyo macalimiinta.

Ka helida waxa ugu badan dugsiga

- Mar haddii aad u dooratay dugsi ilmahaaga ugu lug yeelo sidii aad awoodo. La same xiriir wanaagsan dugsiga iyo macalimiinta ilmahaaga. Waxay caawin doontaa shaqaalaha dugsiga inay adiga iyo ilmahaaga idin bartaan.
- Xiriir joogta ah la yeelo macalinka ilmahaaga si aad u sii wado inaad kala hadasho barnaamijka waxbarasho ee ilmahaaga iyo horumarka iyo wixii arimo cusub ah ee laga yaabo inay ka soo baxaan adiga ama dugsiga.
- Ula hadal sida ugu waxku oolsan si aad u lahaataan isgaarsiin wanaagsan oo u dhexaysa dugsiga iyo guriga.waalid ahaan adigaa ilmahaaga u yaqaan sida ugu fiican. Ahow ilmahaaga taageeraha ugu weyn.
- Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya inaad dugsiga la xiriirto, fadlan wax Adeega Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo weydiiso turjumaan luuqadaada. Xiriiriyaha ayaa wacaya dugsiga oo soo gelin doona turjubaanka taleefanka si uu kaaga caawiyo hadalkaaga. Meeshii suurto gal ah, dugsiga ayaa soo ballaminaya turjumaan si uu u joogo kulanka dugsiga haddii la codsado. adeegyadani waxay kuu noqonayaan bilaash adiga.





Wixii macluumaad dheeraad ah

- www.schools.nsw.edu.au/gotoschool/enrolment/index.php (Website Ingiriis ah)
- *Yaa wax baraya Ilmaheyga? (Who's Going to Teach My Child?)* (Ingiriis Kaliya)
www.schools.nsw.edu.au/media/downloads/schoolsweb/studentsupport/programs/Irngdifficulties/whoteach.pdf
- DVD-ga Khatarta ah Buundooyinka (Critical Bridges DVD) (Ingiriis kaliya)
www.det.nsw.edu.au/detresources/critbridges_YKSeRaDPnn.pdf
- Bilaabida Dugsiga DVD (Starting School DVD) (Macluumaad waxaa lagu heli karaa Arabic, Cantonese, Dari, Dinka, English, Korean, Mandarin and Vietnamese.) Taleefan Gowrie NSW ee (02) 8571 9700 si aad u dalbato nuql.

NSW Department of Education and Communities

Lambarada xiriirka xafiiska gobolka Regional office contact numbers

Hunter/Central Coast	4924 9999
Illawarra & South Coast	4222 2929
New England	6755 5934
North Coast	6652 0500
Northern Sydney	9886 7690
Riverina	6937 3871
South Western Sydney	9796 5446
Sydney	9217 4877
Western NSW	6841 2110
Western Sydney	9208 9359

Xiriirkeyga (My contacts)

Dugsiga xaafada: (Local school:)

Magaca Maamulaha: (Principal name:)

Taleefanka: (Phone:)

Qoraalka: (Notes:)

Xafiiska Gobolka: (Regional office)

Magaca xiriirka: (Contact name)

Taleefanka: (Phone:)

Qoraalka: (Notes:)

© April 2012
NSW Department of Education and Communities
GPO Box 33
Sydney NSW 2001
Australia
T (02) 9561 8000
www.det.nsw.edu.au



Education &
Communities